



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA OKTOOBAR 2023



Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Octoobar 2023 ayaa gaaray 143.59, marka la barbardhigo 142.65 bishii Sebteembar 2023.

Isbedel bileedka, Octoobar 2023, marka la barbar dhigo Sebteembar 2023, sare u kaca ayaa haa 0.67 boqolkiiba. Sare kaca ugu badan ayaa ahaa qiimaha **Isgaarsiinta** 6.19 boqolkiiba iyo **Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska** 5.25 boqolkiiba. Sare kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Isgaarsiinka taas oo ay sababtay qiima koror ku yimid agabka Teelofonka iyo Telefax +8.10 boqolkiiba. Sare ugu badan ayaa ka yimid Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska qiima kororka ayaa ka yimid qiimaha Korontada & Gaaska +9.66 boqolkiiba (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Octoobar 2022 iyo Octoobar 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 6.21 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.44 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Sebteembar 2022 iyo Sebteembar 2023.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Octoobar 2023 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Octoobar 2023	
Tusaha bishan (Octoobar 2023)	143.59
Tusaha bishii hore (Octoobar 2023)	142.65
Tusaha sanadkii hore (Octoobar 2022)	135.20
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.67%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	6.21%

heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12 bilood

Tixraaca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Octoobar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Octoobar 2023

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Octoobar 2023

Heerka sicir-bararka bisha Octoobar 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Octoobar 2022 iyo Octoobar 2023.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 6.21 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Octoobar 2022 iyo Octoobar 2023, marka labar bardhigo 5.44 boqolkiiba 12kii bilood, Sebteembar 2022 iyo Sebteembar 2023.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Octoobar 2023 ayaa sameeyey sare u kac dhan 0.67 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Octoobar 2023.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay -1.62 boqolkiiba, bishii Octoobar 2023 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -1.96 boqolkiiba bishii Sebteembar 2023. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu hoos u dhaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -5.19 boqolkiiba bishii Octoobar 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -2.08 boqolkiiba Sebteembar 2023.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaraya 5.25 boqolkiiba Octoobar 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sameeyey sare u kac dhan 21.07 boqolkiiba Octoobar 2022. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo sare u kacay 15.04 boqolkiiba ee Sebteembar 2023.

Dhammaan qeybaha TSB-da iyo qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Octoobar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Octoobar 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 56.28 boqolkolkiiba bishii Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+86.05 boqolkiiba).
- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 55.43 boqolkiib bishii Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka (Miiraha ah) (+ 96.97 boqolkiiba).
- **Kirada guryaha, Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaray 21.07 boqolkolkiiba bishii Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada & Gaaska (+24.96 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay qiimaha Korontada oo gaaray (+25.00 boqolkiiba)
- **Dharka & Kabaha** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 14.19 boqolkiiba Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+16.56 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka Raga (+33.07 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 13.42 boqolkiiba, bishii Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+29.22 boqolkolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 11.05 boqolkolkiiba bishii Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Adeega Gaadiidka (+32.36 boqolkiiba). Sare u kaca waxaa ka yimid rakabka gawarida dhulka (+49.21 boqolkiiba)
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 9.30 boqolkiiba Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+10.42 boqolkiiba).


- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 7.38 boqolkiiba Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+13.79 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.18 boqolkiiba Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu dhigto dugsiga sare oo u gaaray (+28.26 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 3.60 boqolkiiba bishii Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+5.70 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Octoobar 2023 (-)

- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sanadlaha ahi hoos u dhacay -5.19 boqolkiiba, bishii Octoobar 2023. Hoos u dhaca ugu badan waxaa sababay cuntada oo qiimahoodu gaaray (-5.35 boqolkiiba) Sababta oo ah hoos u dhac ku yimid qiimaha saliida iyo dufanka (-34.88 boqolkiiba).

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Octoobar 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Octoobar 2023 (+)

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac bille ah 6.19 boqolkiiba bishii Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+8.10 boqolkiiba).
- **Kirada guryaha, Korontada** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac bille ah 5.25 boqolkiiba, bishii Octoobar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Korontada & Gaaska (+9.66 boqolkiiba). sare u kaca waxaa sababay qiimaha Korontada oo gaaray (+25.00 boqolkiiba)

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bisha Octoobar 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Octoobar.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Octoobar 2023 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Octoobar 2022 TSB	Sebteembar 2022 TSB	Octoobar 2023 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha Tsb	100.00	135.20	142.65	143.59	0.67	6.21
Cuntada & Cabitaanada	46.04	148.13	142.75	140.43	-1.62	-5.19
Tubaakadda	1.25	107.66	167.33	167.33	0.00	55.43
Dharka & Kabaha	5.03	148.46	169.47	169.52	0.03	14.19
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	122.28	140.67	148.05	5.25	21.07
Agabka Guryaha	2.93	109.53	117.61	117.61	0.00	7.38
Caafimaadka	5.00	161.16	182.78	182.78	0.00	13.42
Gaadiidka	3.77	109.72	121.29	121.85	0.46	11.05
Isgaarsiinta	2.80	103.03	151.63	161.02	6.19	56.28
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	104.30	104.30	0.00	0.43
Tacliinta	4.00	109.11	116.95	116.95	0.00	7.18
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	140.72	145.78	145.78	0.00	3.60
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	110.27	120.52	120.52	0.00	9.30

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Nofeembar, 2023 waxaa la baahin doonaa 15 Deseembar, 2023. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Octoobar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Octoobar 2023 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

qeybaha ka qeybqaata % heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta : NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Octoobar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia